Gobolka Vestfold iyo Telemark

**Heshiis amaahasho  oo ku saabsan Laptp PC/ nettbrett iyo amaahasho agab waxbarasho oo lacag la'aan ah oo u dhexeeya gobolka Vestfol iyo Telemark** (org.nr. 821277062)

iyo

Magaca ardayga

Dhalashada ardayga

# 1. Guud ahaan

## 1.1 U dhexaysa

Heshiiskan waxaa wada galay oo uu ka dhexayaa gobolka Vestfold iyo Telemark iyo ardayga oo amaahde ah.Marka la kala gooyo gobolka Vestfold iyo Telemark heshiiskan waxaa laga wareejinayaa gobolka Vestfold iyo Telemark,waxaana loo wareejinayaa Gobolka Telemarka ama gobolka Vestfold taas oo ku salaysan hadaba gobolka iskoolkaagu ka tirsan yahay.

Hadii aanu ardaygu qaangaar ahayn ,heshiiska waxaa lala gelayaa waalidka ardayga kaas oo ka masuul ah amaahdaha.

Markaan saxiixo waxaa xaqiijinayaa in aan akhriyey nuxurka dukumintiga oo aana aqbalay, oo ana aqbalay shuruudaha gobolka iyo hab raaca isticmaalka iyo sida ardagu ula dhaqmayo PCE/MACbook/nettbrtett (Waxyaabaha loo yaqaan qalabka kumbiyuutarka) iyo agabka waxbarasha oo lacag la'aan ah.

Nidaamka amaahashada ee u dhexeeya gobolka iyo ardayga waxaa nidaamiya shuruudaha heshiiskan.

Heshiiskan waxaa lagu saxiixayaa si dijitaal ah halkan https://elevkontrakter.vtfk.no/

# 2. Amaahashada laptop/PC

## 2.1 Qalabka kumbiyuutarka

### Xuquuqda hantida /xuquuqda isticmaalka

Qalabka kumbiyuutarda sida heshiiska ku qoran waa hantida gobolka, ardigu waxa keliya ee uu xaq u leeyahay waa isticmaalida qalabka kubiyuutarka inta lagu guda jiro xiliga amaahashada

### Qalabka kumbiyuutarka barogaraamada heshiisku daboolay

Nidaamka waxaa ka mid ah oo uu daboolayaa Laptop PC/MACbook Wata jaarjer

Habaynta waxa ka mid ah laptop PC/MACbook oo leh dajiyaha iyo qalab kasta oo dheeraad ah. Haddii ay dhacdo dhaawac ama khasaare, shuruudaha qandaraaska ayaa sidoo kale khuseeya kombuyuutarada cusub ee amaahda.

Heshiiska amaahashada laptp-ka /nettbrett,ka iyo qalab waxbarasho oo lacag la' aan ah. Borogaamadan soo socda ayaa lagu rakibayaa kaas oo ay weheliyaan nidaamka hawlgalka:
• Barnaamijka taageerida xafiiska ee **(Office365)**

• Barnaamijka antivirus-ka
• Barnaamijo kale oo iskoolku u isticmaalo waxbarasha
Waxaa laga yaabaa in uu jiro barnaamijo ka duwan Macbook.

**2.2 lsticmaalka qalabka**
Ardayga waxaa waajib ku ah :
• Waa in la hubiyaa in qalabka laga ilaaliyo waxyeelada iyo in la xado
(tusaale ahaan lagu xafido khaanad la xiri karo,marka la soo qaadanayana boorso lagu rido,lana isticmaalo bac roob,boorso gacmeedna lagu qaado marka la safrayo).
• Cid kale ha amaahin kumbiyuutarka, meelna ha uga tegen iyada oon cidi ilaalinayn.
• Ha soo dejinina waxyaaba wax yeelan kara ama borogaamo kale.
• Waxba ha ka bedelin,hana koobiyayn borogaamada hore loogu diyaariyey kumbiyuutarka iyada oo aadan ogolaansho gaar ah aadan ka haysan.
• Ku hubi in aad soo koobi garaysid waxyaabaha la xiriira dhanka bed qabka.
• Ha ka tirtirin mashiinka calaamadaha(noocyada calaamadaha ah,nambarka wershedu ku samaysay iyo wixii la mid ah).
• Adigu wax calaamada ha ku samayn mashiinka ama waxyaabaha lagu dhejiyo.
Hadii looga shakiyo kumbiyuutarka vurus ama dhibaato kale waa in ardaygu la xiriiraa IT-ga si loogu hagaajiyo pc.Hadii looga shakiyo ama la arko in si khaldan loo isticmaalay kumbiyuutarka,xafiiska IT-gu wuu kaa qaadi karaa kumiyuutarka si loo koontoroolo.Hadii ardaygu keeni waayo waxaa laga xirayaa si aanu u isticmaalin.
Ardayga lama siinayo xuquuqda maamul ee kumbiyuutarka.
lsticmaalka waxaa nidaamiya hab-nidaameedka dugsiyada sare ee gobolka

**2.3. Waxyeelayn**
Dhamaan ciladaha qalabka iyo sidoo kale waxyeelo ama lumida waa in lagu war-geliyaa iskoolka sida ugu dhakhsiiyaha badan ee ugu horaysa ugu danbayn 14 maalmood gudohood.
Ardaygu waa in aan isku deyin in uu **isagu** hagaajiyo waxyeelada,laakiin uu u daayaa iskoolka. hagaajinta aay samayaan adeegyaal aan la ogolayn,waxay keeni kartaa in aan khasaarahaas la daboolin/labixn.
Kasaaraha ama waxyeelada ay keento dayacaad ka timi ardayga,waxaa bixinaya khasaardaas ardayga.
Tusaale ahaan dayacaadu waxay noqon kartaa:
• Cabitaan ama dareere kale hadii lagu daadiyo mashiinka
• Hadii lagu kaydiyo boorasada ama kiiska kumbiyuutarka cabitaano ama dareerayaal.
• Hadii loo qaado qaab aan munaasib ahayn
• Hadii waxyeelo soo gaarto marka aad gaadiid saran tahay
• Hadii la dhigo/saaro meel aan haboonayn tusaale ahaan meel saraysa,.dhulka ama meel koona ah iwm.
• In aad ku isticmaashid meel aan haboonayn (tusaale ahaan meel ciid ah,dhooqo biyo leh, qalbaka alxanka ama waxyaaba kale oo mashiinka waxyeelayn kara warshad iyo wixii lamid ah).
• Aad dhigto meel aadan adiga ama ardayda kale ilaalinayn.
• Hadii waxyeelo ka soo gaarto hadaad shay saarto kiiboorka iyo shaashada dhexdooda kadibana aad xirto.
• Hadii waxyeelo ka soo gaarto meel aan haboonayn oo aad dhigtay darted kumbiyuutarka oo aad adiga ama qof kale ku fariisto.
Waxaad dhiibi qayb lacageed waxyeelada aad u geysato. Qaybta aad dhiibaysaa waxay ku xirnaanaysaa waxyeelada aad geysatay inta ay le'eg tahay hadba.

Haii waxyeelada loo arko taxdar la'aan ardagu waa in uu bixiyaa kharashaka oo dhan.Waxyeelada ku timaada taxadar la'aan waa in ardaygu bixiyo kharashka lagu hagaajiyey.hadii lagu samayo dayacaad kumbiyuutarka ardaygu waa in uu bixiyaa qiimaha hadhaaga ah ee kumbiyuutarka si waafaqsan habraaca gobolka.

**2.4. Xadista**
Hadii ay dhacdo in la xado ardaygu waa in uu si degdeg ah ugu war geliyaa boolska,iskoolkuna waa in loo keenaa nuqul ka mid ah warbixinta xatooyada. Hadii kumbiyuutarka laga xado sanduuqa ardayga oo xiran ama qolka iskoolka oo aan booliska lagu war gelin,ardayga waxaa laga rabaa lacagta oo dhan sababtoo ah waxaa loo arkaa dayacaad.
Xatooyada laga xado meelaha gaarka ah ama meelaha dadweynaha oo uu ku jiro iskoolku waa in uu ardayga/waalidka bixiyaan caymiska.

## 3. Qalab waxbaraho oo lacag la'aan ah

Heshiiskani wuxuu khusayaa sanad dugsiyeedka oo dhan ama hal sano dugsiyeed si loo helo agab waxbarasho oo lacag la'aan ah,kaas oo la soo celinayo marka iskoolku dhamaado ama hadii iskoolka dhexda lagu joojiyo.
Sida kamidka ah nidaamka amaahshada waa in ardayga iyo waalidku saxiixaan heshiiskan,kaas oo ay shuruudaha amaahashada iyo isticmaalka iskoolku ku cadyihiin.

Dhamaan amaahashada waxaa lagu diiwan gelinyaa nidaaka amaahashada ee laybareeriga.
OGAYSIIN-Hadaad iskolka dhamayso.ama maado joojiso ama sanad dugsiyeedka joojiso waa in agabka waxbarashada dib loogu soo celiyaa iskoolka.agabka waxbarasho ee aan la soo celin waxaa loo arkayaa in aad gadateen waxaana boonada aad lacagta ku bixinaysaan loo soo
Dirayaa ardayga/waalidka.Qiirnaha iibka dhabta ah baa laguu soo diri.

**Isticmaalka qalabka:**
Dharnaan agabka waxbarshada ee ardaygu amaahdo waa hantida iskoolka.Hadii ardaygu ka tago iskoolka inta lagu guda jiro sanad dugsiyeedka,waa in dhamaan agabka waxbarashada isla rnarkiiba la soo celiyaa.

Waajibaadka ardayga:
• Aad si masuuliyad leh ula dhaqanto agabka waxbarashada si aanay u soo gaarin daal iyo jeexdin aan loo baahnayn.
• Ha isticnaalin calaamad.hoosta ka xariiqid qoraalka.ama aadan wax ku qorin buugaagata aad amaahatay.
• Aad ka ilaalisid in calaamada ama beyjaj ka maqnayn buugga, bogaggu aan biyo gaarin.la wasakhayn aana daal aan kan caadiga ahayn loo geysan.

Hadii la lumiyo ama la waxyeelayo qalabka waxbarshahsda qofka ku saxeexan baa si buuxda masuul uga ah mag-dhawga,mag-dowga lagaa dhaafi mayo hadii xitaa aad soo celiso ka dib wakhtiga kama danbaysta ah qalabka waxbarashada.

## 4. Saxiixida

**Heshiis ku saabsan amaahashada kumbiyuutarka ama agabka waxbarasho ee lacag la'aanta ah**

Waxaan cadaynayaa in aan akhriyey waxaa ku qoran dukumentigan, Saxiixaygu wuxuu cadaynayaa in aa aqbalay shuruudaha gobolka iyo hab raaca isticmaalka iyo sida ardaygu ula dhaqmayo kumbiyuutarka iyo shuruudaha iyo tilmaamaha isticmaalida iyo maaraynta agabka waxbarasho ee lacag la'aanta ah ee uu amaahday.

Hadii ay dhacdo qaansheegad la xiriira in ardaygu soo celiyo agabkii waxbarasho ee lacag la'aanta ahaa ama dayacaad si waafaqsan heshiiska, adaygu wuxuu loo soo dirayaa qaan sheegad, hadii ardaygu bixin waayo lacagta qaansheegadka ah,waxaa loo soo dirayaa qoraal xusuusin ah in loo dirayo Inkasso,gobolku lacagta uu dalbayo wuxuu ku wareejin karaa hayada kale.

Ardayga da'diisu ka yar tahay 18 sano,wixii la xiriira lacag bixin la'aan waxaa masuul ka ah waalidka/masuulka saxiixay.
Cidii aan ku qancsanay heshiiska waxay la xiriiri karaan maxkamada
Nedre Telemarka tingrett
Gobolka Vestfold iyo Telemark
Goobta iyo taariikhda: Skien August 2023
Helge Galdal
Agaasimaha waxbarashada iyo caafimaadka dadweynaha

| Goobta iyo taariikhda | Masuulka ka yar 18 sano – saxiixa waalidka: |
|---|---|
| Magaca ardayga (xarfo waaweyn) | Magaca waalidka ( xarfo waaweyn) |